Alaabka laga tegay

Haddii aad guurto, ama lagaa saaro, gurigaaga kirada ah oo aad alaabtaada qaarkeed kaga tagto (tusaale, dhar, alaabta guriga) ama dukumiintiyo shakhsiyeed (tusaale sawiro, warqado), mulkiiluhu waa inuu la macaamilaa isagoo isticmaalaya nidaamka lagu dejiyey *Sharciga Kireystayaasha Degaanka ee 1997*.

Haddii aad ka tagtid alaab ama dukumiintiyo shakhsiyeed , waxa ugu horeeya ee aad sameynayso waa la xiriir mulkiilahaaga ama wakiilka guriga lana sameyso wakhti aad ku qaadatid. Sida ugu dhakhsaha badan ee aad sidaan u sameysid, khatarta ay alaabtaasi ama dukumiintigaasi ku waxyeeloobayaa waa yar yahay ama meesha lagaga qaadayo ama inaad bixiso lacagta qolyaha alaabta qaada ama kharashka bakhaarka mulkiilaha. Haddii ku baxeyso wakhti kooban gudihiis ka dib waxaa wanaagsan inaad qaadato wax kasta oo muhiim ah lacala haddii intii ay lumi lahaayeen ama waxyeeloobi lahaayeen.

➲ Markaad guureysid waa feker fiican inaad kaga tagtomulkiilaha cinwaan wax laguugu soo hagaajiyo ama lambarka taleefankaaga, Maxkamada Maamulka iyo Madaniga Victoria (VCAT) (haddii la sameeyey codsi) oo ay Hay'ada Carbuunta Kireystayaasha Degaanku (RTBA) foomkaaga 'Dalabka Carbuunta". Tan ayaa kuu sahleysa in lagaala soo xiriiro wax ku saabsan wixii alaab ah ee aad ka tagto.

Haddii aadan alaabtaada qaadan , mulkiilaha ama wakiilku waa inay raacaan nidaamka hoos ku qoran. Haddii aysan raacin oo alaabtaada ama dukumiintigaagu uu lumo ama waxyeeloobo, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato inaad dalbato magdhow. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg warqada xaqiiqda ee ***Dalbashada Magdhowga***.

Dukumiintiga shakhsiyeed

Haddii aad ka tagto dukumiinti shakhsiyeed (tusaale dukumiinti rasmi ah, sawiro, warqado) guriga , mulkiilaha ama wakiilku waa inay ilaaliyaan ugu yaraan 90 maalmood. Way qaadi karaan dukumiintiga laakiinse waa inaysan baabiin ama tuurin. Waa inay qaadaan talaabooyin macquul ah si laguugu sheego sidii aad dukumiintiga u ururin lahayd.

Waa inaad siisaa mulkiilaha kharash macquul ah oo ku lug leh qaadida iyo keydinta dukumiintigaaga ka hor intaadan dib u helin. Haddii aad bixiso kharashka mulkiilaha waa inaysan diidin inay kuu soo celiyaan dukumiintigaaga, xitaa haddii ay lacag kuugu leeyihiin siyaalo kale sida kiro kugu ururtay.

Haddii aadan dib u dalban dukumiintiga 90 maalmood gudahood, mulkiilaha ama wakiilku wuxuu raacay talaabooyinka kore. Dukumiintiyada waa la baabiin karaa (ilaa uu ilaalinayo sharci kale mooyee).

Alaabta guud
Tuurida alaabta guud

Mulkiilaha waxaa laga yaabaa inuu baabiiyo ama tuuro alaabta guriga lagaga tegay haddii :

> aysan gooneynin wax lacag ah

> cuntooyinka xumaanaya

> khatar ama dhib badan

Mulkiiluhu wuxuu sidoo kale qaadi karaa oo baabiin karaa ama haddii kale iibin karaa alaabta lacagta joogta, haddii qiimaha laysku daray ee alaabtu uu ka yar yahay kharashka la qiyaasay ee lagu qaadayo, bakhaar lagu dhigayo iyo iibinta dhammaan alaabta.

Mulkiiluhu waxaa laga yaabaa inuu weydiiyo Agaasimaha Consumer Affairs Victoria inuu qiimeeyo haddii alaabta la baabiin karo ama la iibin karo iyo in kale. Kormeeraha Consumer Affairs ayaa badanaa siin doona mulkiilaha warbixin qoraal ah.

Keydiinta alaabta guud

Haddii aan alaabta la baabiin Karin ama la iibin Karin mulkiiluhu waa inuu si ammaan ah u keydiiyaa ugu yaraan 28 maalmood. Mulkiiluhu waa inuu kuu soo diraa ogeysiis 7 maalmood gudahood ka dib markuu alaabta bakhaar dhigo, isagoo kuu sheegaya in alaabtaadii bakhaar la dhigay oo uu kuu sharxayo sidaad dib ugu heli karto haddii mulkiiluhu uusan heysan cinwaankaaga laguugu soo diri lahaa, waa inay ogeysiis ku qoraan wargeys lagu qaybiyo Victoria.

Kala soco xagga kale

Macluumaadkan waa hagitaan oo kaliya waana inaan loo isticmaalin bedelka tallada sharci ee aqoon yahanka

Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **July 2013** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Warqada xaqiiqda

Ogeysiiskuna waa inuu lahaadaa macluumaadka soo socda:

> meesha alaabta lagu keydiyey

> lacagta qaadida alaabta iyo bakhaar dhiga

> lacagta maalintii alaabada lagu heynayo

> in 28 maalmood gudahood alaabada la iibin doono

> maalinta alaabada lagu iibin doono xaraashka

> wakhtiga iyo taariikhda xaraashka haddii la yaqaan

> Inaad u dalban karto alaabtaadii oo kaliya ka dib markaad siiso mulkiilaha kharashka macquulka ah ee lagu qaaday bakhaarkana lagu dhigay alaabtan.

Dib u dalbashada alaabta guud

Adiga (ama qofka leh alaabta haddii qof kale leeyahay) ayaa dib u dalban kara alaabta wakhti kasta ka hor intaan la iibin, ka dib bixinta kharashkaas kore. Mulkiiluhu waa inuu kuu soo celiyaa alaabta islamarkaad bixisid kharashaadkan, xitaa haddii ay kugu leeyihiin lacag sababo kale awgood sida kiro kugu ururtay.

Haddii mulkiilaha ama wakiilkiisu diido inay kuu soo celiyaan alaabta ama dukumiintiga ama ay ku weydiisanayaan inaad bixiso kharash aan macquul ahayn si aad u dib ugu hesho alaabtaadii ama dukumiintigaagii ka dib waxaad dalban kartaa Maxkamad si aad u xaliso isafgaranwaagan. Samee uun codsi guud oo ah VCAT. Ka eeg wixii macluumaad dheeraad ah warqada xaqiiqda eek u saabsan ***Maxkamada Maamulka iyo Madaniga ee Victoria***.

➲ Waa debmi inuu mulkiiluhu diido inuu soo celiyo alaabtaada ama dukumiintigaaga shakhsiyeed ka dib markii aad bixisay kharashkii khuseeyey. Haddii alaabta haddaba la iibiyey, waa inaad kala xiriirtaa Ururka Kireystayaasha wixii tallo ah.

libinta alaabta guud

Haddii aadan ku dalban alaabtaada 28 maalmood gudahood , mulkiiluhu wuxuu ku iibin karaa xaraash dadweyne. Xaraashka waa in lagu xayeysiiyaa wargeys Victoria lagu qaybiyo ugu yaraan 14 maalmood ka hor. Haddii alaabta la iibiyey 8 toddobaad gudahood markii bakhaarka la dhigay, mulkiiluhu wuxuu u isticmaali karaa waxa ka soo baxay iibka inay u gudo lacagta uu kugu leeyahay, haddii uu lacagtaa kuugu leeyahay iibinta iyo keydiinta alaabtaba ama uu kuugu leeyahay ka dib amar ay VCAT gaartay oo ah magdhow ama kiro ururtay.

Magdhow

Haddii mulkiiluhu uu baabiiyo, tuuro ama iibiyo alaabtaada guud ama dukumiintiga shakhsiyeed isagoon raacin nidaamka saxda ah, waxaad ka dalban kartaa VCAT magdhow, ka eeg warqada xaqiiqda ***Dalbashada Magdhowga*** wixii macluumaad dheeraad ah.

Haddii mulkiiluhu uu iibiyey alaabta oo uu raacay nidaamka saxda ah, alaabta laguuma soo celin karo. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dalban kartaa Maxkamada in lagu siiyo wixii lacag ah eek a soo harey iibka marka laga gooyo wixii lacag ah ee uu mulkiiluhu kugu leeyahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha ☎ (03) 9416 2577.

Warqada xaqiiqda

TENANTS UNION of Victoria Ltd

Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **July 2013**
Tenants help 03 9416 2577 55 Johnston Street Fitzroy **tuv.org.au**
The Tenants Union of Victoria acknowledges the support of the Victorian Government.

State Government Victoria